



## Aan ka bixino sannadkaaga koowaad ee kulliyadda ASCENT

Waa maxay ASCENT? Darda Galinta Ardayda iyadoo loo Marayo Isdiiwangelinta isku xigta (**ASCENT**) waa barnaamij dugsi sare oo shanaad ah oo u ogolaanaya ardayda inay koorsooyin ku qaataan kuliyaada/jaamacada ama kuliyaada farsamada ka dib sanadka ay dhameeyaan fasalka 12aad. Waxaan ka bixinaynaa kharashka waxbarashada, khidmadaha loo baahan yahay iyo buugaagta.



## Ardaygu waa inuu buuxiyaa shuruudooyin dhowr ah si looga aqbalo barnaamijka ASCENT.

1. Ardaygu waa inuu dhamaystiray, ama ku jiraa jadwalka si uu u dhammaystiro, ugu yaraan 9 saacadood oo ah dhibcaha loo baahanyahay, koorso heer kulliyad ah dhamaadka sannad-fasalka 12aad.
  - Dhibcahan waxaa badanaa lagu helaa Diiwaangelinta Isku-dhafaan ama fasallada Diiwaangelinta Labaad ee dugsi sare ama Xarunta Hal-abuurka ee Cherry Creek.
  - Dhibcaha kuleejka waxaa sidoo kale lagu heli karaa qaadashada koorsoada AP iyo ka gudubka imtixaanka AP inta lagu jiro fasalada 9<sup>th</sup>, 10<sup>th</sup> iyo 11<sup>th</sup>. Dhibcaha imtixaanka AP waa in lagu qoraa dhibcaha kulliyadda ka hor inta aan la codsan ASCENT si loogu xisaabiyo qayb ka mid ah 9ka saacadood ee dhibcaha ah.
2. Ardaygu waa u Diyaar Kuliyaada umana baahna korsooyin taakulayn sida waafaqsan barnaamijka uu doortay. Fiiri shaxda boga xiga ee shuruudaha kuliyaada.
3. Ardaygu kuma jirin ASCENT hada ka hore (ardaygu wuxuu ka qaybqaadan karaa oo keliya ASCENT hal sanad dugsiyeedka 1).
4. Ardaygu wuxuu codsaday oo loo aqbalay barnaamijka dugsi sare ka dib kuliyaadaha Colorado ee tacliinta sare oo bixisa fasalo isku dhafaan oo isku mid ah.
5. Ardaygu wuxuu codsaday oo laga aqbalay barnaamijka ASCENT. Codsigu wuxuu furmayaa horraanta Noofambar wuxuuna dhamaanayaa March 1deeda.

## Waa kuwee kuliyaadaha ka qaybqaata barnaamijka ASCENT?

Laga bilaabo Oktoobar 2023, kuliyaadaha soo socdaa waxay kaqeyb qaateen barnaamijka ASCENT: Arapahoe Community College, Community College of Aurora, Community College of Denver, Red Rocks Community College, Metropolitan State Denver, University of Northern Colorado, Emily Griffith Technical College, Pickens Technical Waxaa jira dhowr dugsi oo kale oo degmadeenu ka fiirsan doonto ASCENT laakiin waxaa loogu talagalay oo keliya barnaamijyo khaas ah.



### Sidee ardayga loo tixgeliyaa inuu diyaar u yahay kulliyad?

Ardaygu waa inuu diyaar u ahaada kulliyad xaga xisaabta iyo Ingiriiska labadaas oo lagu gaaro dhibcaha imtixaanka, koorsooyinka ama isku darka labadaba.

<b>Ingiriis</b>	<b>Xisaab</b>
SAT Ingiriis - 470 ACT Ingiriis - 18 Accuplacer Qoraalka Jiilka Xiga - 246 Accuplacer Jiilka Xiga AAF - 235	Xisaabta SAT - 500 Xisaabta ACT - 19
ENG 1021 - CE Ingiriisi Halabuurka (Is Diiwaangelinta isku dhafan hel C ama ka fiican)	MAT 1340 - Kuliyaadda CE Algebra (Is Diiwaangelinta isku dhafan hel C ama ka fiican))

### Sidee buu u shaqeeyaa ASCENT?

- Ardaydu waxay heli doonaan waxbarasho, buugaag iyo khidmadaha loo baahan yahay oo laga bixiyo simistarka deyrta-fallka iyo semester guga-spring isla markiiba ka dib sanadka qalin-jabinta
- Ardayda ASCENT waxay noqon doonaan arday waqti-nus ah (3-11 saacadood simistar kasta) ama arday waqti-buuxa ah (12-16 saacadood oo simistar kasta.)
- Ardaygu wuxuu weli yahay arday ku sugan Degmada Dugsiga Cherry Creek hal sano oo dheeri ah kadib fasalka 12aad. Tan waxaa lagu magacaabaa inuu yahay fasalka 5aad ee dugsiga sare. Sababtoo ah ardayga wali waxaa loo tixgeliyaa inuu yahay arday dugsi sare, ardaygu ma heli doono kaalmada maaliyadeed ee federaalka iyo deeqaha waxbarasho ee loogu talagalay ardayda cusub inta ay ka qaybgalayaan ASCENT.
- Sanduuqa Fursada Colorado (COF) wuxuu hoos u dhigayaa kharashka waxbarashada ee machadka dugsiga sare kadib CCSD waxay bixinaysaa kharashaadka waxbarashada ee haray.
- Dhibcaha iyo buundooyinka lagu kasbaday ASCENT waxaa lagu dari doonaa qoraalka dugsiga sare iyo qoraalka kuleejka.
- Ardaygu wuxuu fasalo ka qaadan karaa kuliyaada ama dugsiga farsamada. Fasalada badankood waa inay ahaadaan kuwo lagu qaato kuliyaada dhexdeeda.
- Ardaydu waxay heli doonaan dibloomada dugsiga sare ka dib markay dhameeyaan sanadka ASCENT oo leh taariikhda qalin-jabinta ee guga-spring sanadka ASCENT.
- Ardayda waxaa lagu dhiirigelinayaa inay kaqeybqaataan “qalinjabinta bulshada” hadii ay dhamasteen shuruudaha qalin jabinta. Tan waxay ka dhigan tahay inay ka soo qaybgalayaan xaflada qalin-jabinta sanadkii loo qorsheeyay. magacooda wuxuu ku jiri doonaa barnaamijka qalin-jabinta iyo dhammaan howlaha kale ee qalin-jabinta



dabaaldega ah. Dibloomada rasmiga ah ee dugsiga sare yaa dib loo dhigi doonaa hal sano, illaa ay ka dhammeeyaan sannadkooda ASCENT.

- Degmadu waxay bixin kartaa warqad sheegaysa in ardaygu buuxiyay shuruudaha qalin-jabinta dugsiga sare hadii ardaygu u baahan yahay dukumiinti xaga shaqada, caymiska, iwm.
- Qoyska ardaygu waa inay dhammaystiraan buuxinta khadka tooska ah ee simistarka dayrta-fall [my.cherrycreekschools.org](http://my.cherrycreekschools.org) laakiin ardaygu uma baahna inuu aado xarunta dugsiga sare.

### Sida loo Codsado

- Ardaygu waa inuu marka hore la kulmo la-taliyahooda dugsiga sare si uu ugala hadlo ASCENT, u arko hadii ay u qalmaan oo ay wax ka bartaan barnaamijka.
- Ardaygu wuxuu codsadaa inta u dhaxaysa Noofambar 1 iyo March 1 ee sanadka 12.
- Ardaygu waa inuu keenaa goraal aan rasmi ahayn oo kuliyad ah dugsiga kasta oo ay ku kasbadeen dhibcaha kulliyadda iyada oo loo marayo diiwaangelinta isku midka ah ama fasallada isqorista laba geesoodka ah, ama iyada oo loo marayo dhibcaha imtixaanka Meelaynta Sare (AP).
- Ardayga waxaa lagu ogeysiin doonaa aqbalaaddooda barnaamijka ASCENT dhamaadka March.
- Ardayga iyo mas'uulka yaa dib u fiirin doona oo saxiixi doona heshiiska ASCENT hab elektirooniga ah. Heshiiskan waxaa loo diri doonaa cinwaanka emaylka CCSD ee ardayga iyo cinwaanka iimaylka Qoyska 1/Mas'uulka 1. Waxay noqon doontaa "PandaDoc" luqadda uu ardaygu codsaday. Sida "PandaDoc," saxiixayaasha ayaa dib u eegi kara, bilow ah oo saxiixi kara elektaroonig ahaan.
- Ardayga waa laga aqbali karaa ASCENT ka dibna wuxuu go'aansan karaa inuusan kaqeybgalin. Codsigu ma aha heshiis qasab ah.
- Ma jiraan wax ganaaxyo dhaqaale ah hadii ardaygu go'aansado inuu ka baxo barnaamijka ASCENT.

Xiriirinta si aad u dalbato ASCENT waa: [www.cherrycreekschools.org/page/14839](http://www.cherrycreekschools.org/page/14839)



### Wixii macluumaad dheeraad ah

La xiriir la-taliyaha dugsiga sare ee ardayga

La xiriir Waaxda Diyaargarowga Shaqaalaha Sare ee CCSD

Tara Bell, Maamulaha, [tbell18@cherrycreekschools.org](mailto:tbell18@cherrycreekschools.org)

Margaret Krob, Kaaliyaha, [mkrob@cherrycreekschools.org](mailto:mkrob@cherrycreekschools.org)

Dib u fiiri macluumaadka boga internetka ee Degmada

[www.cherrycreekschools.org/page/14839](http://www.cherrycreekschools.org/page/14839)

Dib u eeg websaydhka Waaxda Waxbarashada ee Colorado

<https://www.cde.state.co.us/postsecondary/ascentfaqs>